

Tallooyinka Waxbarashada Khadka ama onleenka Ah: Qoysaska CPS ee Ardayda Dugsiga Hoose (Fasalada JK-5)



Maadaama dhismayaashii iskuulka la xiray, dhammaan kuweenaan jooga Cambridge Public School (Iskuullada Dowliga ah ee Cambridge) waxaan si aad ah ugu dadaaleeynaa sidii aan ku heli lahayn habab hal abuur leh oo waxbarashada khadka ah loogaga dhigo mid madadaalo leh, mashquulin leh, oo guul u ah ardada da'adoodu kala duwan tahay. Halkan waxaa ku yaal qaar ka mid ah tilmaamaha loogu talagalay qoysaska sidii ay ardada uga dhigi lahaayeen kuwo firfircoon, mashquulsan, oo caafimaad ku jooga guriga.



Sameeyso jadwal joogto ah oo si joogto ah u raac.

U abuur jadwalka maalmaha iskuulka kaas oo dhammaystiraya jadwalka qoyskaaga gaarka u ah. Diirada aad ha u saarin inuu noqdo jadwal adag maadaama hadafka ugu weyn yahay inuu bixiyo dareen joogto ah, oo leh waqti waxbarasho, madadaalo, jimicsi, cunno, iyo hurdo.




U qorshee boos banaan oo wax lagu barto.

U oggolow cunuggaaga inuu kaa caawiyo sidii go'aan looga gaari lahaa sida booska banaan ee wax lagu barto loo hagaajin lahaa. Haddii ay tahay goob shaqo oo ku meelgaar ah (sida miiska jikada oo ay sidoo kale qoyska wax ku cunaan), ku caawi cunuggaaga in uu qurxiyo sanduuq ama boorso si uu ugu keydiyo aaladda elektirooniga ah iyo wixii agab dugsi ah iyo agabka waxbarasho ee yaala guriga. In agabka iyo alaabta gees loo dhigo marka shaqada dugsiga la sameeyo waxay gacan ka geysaneysaa calaamadaynta dhammaadka maalin dugsiyeed kasta.



Sii cunugaaga hawlo kala duwan oo waxbarasho.

Ku caawi cunuggaaga sidii uu ula qabsan lahaa hawlaha kaladuwan iyo alaabta guriga ee maalin kasta loo isticmaali karo waxbarasho iyo sahmin. Haddii aad guriga ku haysatid halxiraalayaal, buugaag, qalab farshaxan, iyo xulashooyinka kale ee aan elektirooniga ahayn, ku dhiirrigeli cunuggaaga inuu ka dhigo qayb ka mid ah maalinta dugsiga.



Maalin kasta ka bilow qorshe hawleed.

Ka eeg cinwaanka iimeylka ama Fasalka Google wixii fariimo ah ee laga soo diro dugsiga cunuggaaga si aad u ogaato casharada iyo nashaadyada loo qorsheeyay maalinta. Qorsheey maalin wax barasho oo qiyaastii ah kala badh dhererka maalin dugsiyeedka caadiga ah - ilaa 3 saacadood. Waqtiga u kala qeybi dhowr qaybood oo hawlo kala duwan ah, iyadoo fasaxyo la kala dhexgelinayo. Qeybaha waxay noqon doonaan kuwo iskugu jira waxbarasho uu hogaaminaayo macalinka, waxbarashada iskaa ah, iyo howlaha ay qabanayaan waalidiinta/xannaaneeyayaasha. Xusuusnow, dhamaan waxbarashada ma noqon doonto mid onleen ah.



La xiriir macallimiinta ilmahaaga.

Macallimiintu waxay ku dadaalayaan inay joogteeyaan xiriirka laba-geesoodka ah ee ay la yeelanaayaan ardada intii suurto ah. Macallimiinta ayaa diyaar u ah inay taageeraan ardada waqtiga dhabta ah inta lagu gudajiro jadwalada ah 30-45 daqiiqadood maalin kasta. Qaarkood waxay hogaamin doonaan casharka fasalka, martigeliyaan "Kulanka Subaxnimo" iyadoo la isticmaalayo Google Meet, ama la shaqeyn doonaan ardada kooxo yaryar ah. Kuwa kale waxay ardayda kula xiriiri doonaan taleefanka, iimayl, Ablikeeshanka Remind app, iyo siyaabo kale. La xiriir macalinka, maamulaha ama xiriiriyaha qoyska haddii aad u baahan tahay caawimaad.



Dibadda u bax oo jimicsi samee.

Isku day inaad dibadda ugu baxdo si joogto ah oo aad hesho siyaabo uu cunuggaagu u sii ahaado mid firfircoon. In kastoo garoomada ciyaarta ay xiranyihiin, wali waxaad u aadi kartaa socod ama baaskiil wadid. Kaliya xasuusnow inaad xirato maaskaro oo sii wado inaad ku dhaqanto kala-fogaanshaha bulshada adigoo ugu yaraan 6 fiit ka fogaanaya dadka aan adiga kula noolayn. Xitaa maalmaha roobka, waxaad ku mashquulin kartaa nashaadyada iskala bixinta iyo jimicsiga guriga dhexdiisa lagu sameeyo.



La hadal ilmahaaga.

Wax ku barashada guriga wuxuu noo yahay isbedel weyn dhammaanteen, gaar ahaan carruurta yaryar. Cunuggaaga kala hadal waaya-aragnimada isku dayga wax-barashada xilliga iskuulada ay xiran yihiin. Ku caawi cunuggaaga inuu ka guuleysto wixii cabsi ama welwel ah adigoo u nasteexeynaya, dhiirrigelinaya, kuna amaanaya inuu si adag u shaqeyo waqtiyada adag.



Iska baashaal!

Xilligan la joogo maahan xilligii "shaqada oo aan cayaar lahayn." Aad ayey muhiim ugu tahay in qoysaska ay raadiyaan habab hal abuur leh oo ay ku wada qoslaan oo ay si wadajir ah ugu madadaalaan. Daawo fiidiyowyo qosol leh, sheeg kaftan, ciyaar cayaaro, wax kari, hees ama dheel. Samee waxkasta oo qoyskaaga ka farxiya.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo cpsd.us/athome. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad ka welwelsan tahay, fadlan la xiriir dugsiga cunuggaaga, ama iimayl ku dir cps@cpsd.us.